

# Xaqiiqooqinka la rabo inaad ogaatid oo ku saabsan Codeynta iyo Doorashooyinka



## Doorashooyinka Degmadda Multnomah (Multnomah County Elections)

### Yaa isku diiwaan gelin kara in ay ka codeeyaan Oregon?

Waxaad isku diiwaan gelin kartaa in aad codeeysid haddii aad ku nooshahay (deggantahay) Oregon, oo aad tahay muwaadin Mareykanka ah, oo aad ugu yaraan tahay 16 sano jir. Waxaad ka heli doonaa codbixintaada ugu horeysa ee boostada marka aad tahay ugu yaraan 18 jir.

### Sidee baan isugu diiwaan gelin karaa in aan codeeyo?

- **isku diiwaan geli in aad ku codeeysid onleenka** adigoo booqanaya shabkada Xoghayaha Gobolka Oregon ee [oregonvotes.gov/myvote](https://oregonvotes.gov/myvote). Waa in aad haysataa liisan ama kaadhka aqoonsiga darawalka Oregon si aad isku diiwaan gelisid codeeynta onleenka.
- **isku diiwaan geli in aad ku codeeysid buuxinta warqad**
- Kaarka Diiwaangelinta Codeeynta Oregon. Waxaad ka heli kartaa kaarka warqada ah xafiiska doorashada ee Degmada Multnomah, maktabadda dadweynaha, Xafiiska Waaxda Oregon ee Baabuurta (DMV), ama xafiiska boostadda.
- Haddii aad soo booqato DMV Oregon oo aad hesho liisanka darawalnimada cusub ah ama mid beddelaad ah, ruqsadda baabuur wadista ah, ama kaarka aqoonsiga waxaa lagu diiwaan gelin karaa inaad codayso adigoo aan samaynin wax kaloo dheeraad ah (Habka Diiwaangelinta Automatiga ah ee Codeeyeyaasha baabuurta (Oregon)). Waxaa lagu diiwaangelin karaa in aad u codaysid si automatig ah laakiin hadda isla markiiba ma dhici doonta.

Wac Doorashooyinka Degmadda Multnomah su'aalo ama caawin si aad isku diiwaangelisid in aad u codaysid.

### Sidee baa codaynta boostadda u shaqaynaysaa?

Dhammaan doorashooyinka Oregon waxaa sameeya xafiiska doorashooyinka gobolka. Xafiiska doorashooyinka degmadda waxay boostada si toos ah codbixiyayaasha ugu soo dirayaan warqadaha codbixinta. Codbixiyayaasha waxay buuxinayaan warqada codbixinta, ka dibna waxay ku soo celinayaan xafiiska doorashada degmadda iyagoo ku soo diraya boostadda ama ama ay kuridayaan sanduuga rasmi ah. Waxaad ku codayn kartaa boostadda Oregon adigoo qaadaya lix tallaabo ah oo fudud:

1. Isku diiwaangeli in aad ku codaysid onleenka, warqad ahaan, ama iyada oo loo marayo hab diiwaangelinta automatiga ah. Waxaad boostadda ka heli doontaa Kaarka Wergelinta Codaynta. Kaarka Oo Xaqiijinaayo In aad u diiwaangashantahay in aad codaysid. Waxaad kaloo wici kartaa ama booqan kartaa Doorashooyinka Degmadda Multnomah si aad u ogaatid.
2. Afar toddobaad doorashada ka hor waxaad ka heli doontaa boostad Buug-yaraha Codbixiyayaasha. Buug-yaraha Codbixiyayaasha 'waa buug yare ay sameeyeen Xoghayaha Gobolka Oregon iyo Doorashooyinka Degmadda Multnomah. Buug-yaraha Codbixiyayaasha 'ayaa waxaan ku qoran macluumaad ku saabsan musharaxiinta iyo isbedelka sharciyada la soo jeediyey. Kuwani waxay noqon karaan musharax ama sharciyada degaanka (magaalada, gobolka, iyo degmadda), heer gobol ah ama heer qaran ah (wadanka). Buug-yaraha Codbixiyayaasha ayaa waxaa laga heli karaa barta internetka ee [oregonvotes.gov](https://oregonvotes.gov).
3. Laba todobaad doorashada ka hor waxaad boostada ka heli doontaa warqadaada codbixinta. Haddii aadan helin warqadaada codbixinta wac Doorashooyinka Degmadda Multnomah si aad u hesho warqadda doorashada oo cusub.
4. Codee adigoo buuxinaya warqada cod-bixinta. Waraaqaha codeeynta waxay keliyo yihiin kuwo Ingiriisi ku qoran, laakiin waxaad ka codsan kartaa turjumaan luqad kasta si aad u

hubiso in aad fahamtay warqadaada cod-bixinta. Marka aad go'aansato sida aad u codayn lahayd, isticmaal qalin buluug ama madow si ay u calaamadisid doorashooyinkaaga. Waxaa kaloo ka tegi kartaa wax maran. Waxaad qori kartaa in musharax u taaganyahay tartanka kasta. Haddii aad khalad samayso ama lumiso codbixinta wac Doorashooyinka Degmadda Multnomah si aad u heshid warqad cusub ee cod bixinta ah.

5. Ku rid warqadaada cod-bixinta galka warqada ee celinta. Hubi in magacaaga iyo cinwaankaaga uu sax yahay. Waa inaad **saxiixdaa galka warqada celinta si** codkaaga loo tiriyo. Haddii aadan awoodin in aad saxeexdid galka warqada iyaddoo sababtu tahay naafanimo daraadeed wac Doorashooyinka Degmadda Multnomah si ay kuu caawiyaan.
6. Soo Celi warqadaada cod-bixinta. Waxaad boosta ku soo diri kartaa warqadaada codbixinta iyadoo leh tigidhka " First Class" ama waxaad kusoo ridi kartaa goobta sanduuqa cod-bixinta rasmiga ah. Waxaa jira sideed 24-ka saac goobaha sanduuqa kuridsta iyo sanduuqyada kuridista codbixinta rasmiga ah gudaha meel kasta Maktabada Degmadda Multnomah marka ay maktabadda furan tahay. Waraaqaha codaynta waa inay yimaadaan Xafiiska Doorashooyinka ama waa in la geliyaa gudaha sanduuqa kuridista rasmiga ah 8:00 PM Maalinta Doorashada. Haddii aad boosta kusoo dirtid warqadada codeynta, hubi in aad sidaas sameeysid ugu yaraan hal toddobaad ka hor maalinta doorashada si loo hubiyo in ay ku imaan doonaan waqtiga.

## Yaan weyddiyaa markii aan qabo su'aalo dheeraad ah?

La xiriir Doorashooyinka Degmadda Multnomah:

Saacadaha: Isniin - Jimcaha 8:00 AM - 5:00 PM.

Wac ugu yaran saacadaha furitaanka dheeraad ah oo u dhow doorashada.

Cinwaanka: 1040 SE Morrison Street, Portland, OR 97214

Telefoonka: 503-988-3720 | Faagas: 503-988-3719 | TTY Relay: 711

Emaylka: [elections@multco.us](mailto:elections@multco.us)

La xiriir Xoghayaha Oregon ee Gobolka, Qaybta Doorashooyinka:

Telefoonka: 1-866-673-8683 | Faagas: 503-373-7414 | TTY Relay: 711

Eimaylka: [elections.sos@state.or.us](mailto:elections.sos@state.or.us)

## Ma heli karaa caawimada codeynta ee afka hooyo?

**Haa.** Doorashooyinka Degmadda Multnomah waxay bixisaa turjubaan, lacag la'aan ah, cid kasta oo u baahan caawimaad ee talaabo kasta oo ka mid codbixinta, oo ay ku jiraan:

- Is diiwaangelinta Codeynta
- Calaamadaynta ama akhriska codbixinta
- Cusboonaysiinta cinwaankaaga, magacaaga, xisbiyada siyaasadeed, ama macluumaad kale oo codeynta
- Fahmida sharciyada iyo tallaabooyinka doorashooyinka ee codbixinta
- Caawimaad kasta oo la xiriirta doorashooyinka

**Caawimadu had iyo jeer waa lacag la'aan.** Wixii caawimaad ah wac, iimayl u dir, ama booqo xafiiska doorashooyinka. Turjumaada Telefoonka oo luuqada kasta ah ayaa la heli karaa oo waxaa jira shaqaalaha doorashada oo laba luqoodlayaal ah. Waxaad kaloo wici kartaa xoghayaha Gobolka, Qaybta Doorashooyinka si aad u codsato turjumaan.



## Ma heli karaa caawimada codaynta haddii aan naafo ahay?

**Haa.** Doorashooyinka Degmadda Multnomah waxay siiisaa caawimo codbixinta iyo doorashada la xidhiidha cod bixiyayaasha naafada ah. Doorashooyinka Degmadda Multnomah waxay kaa caawin karaan gurigaaga ama xafiiska doorashooyinka **caawimadu had iyo jeer waa lacag la'aan**. Wac, iimayl u dir, ama booqo Doorashooyinka Degmada Multnomah in aad hesho caawimo tallaabo kasta oo codbixinta ah oo ay ka mid yihiin:

- Is diiwaangelinta Codeynta
- Calaamadaynta ama akhriska codbixinta
- Cusboonaysiinta cinwaankaaga, magacaaga, xisbiyada siyaasadeed, ama macluumaad kale oo codeynta
- Fahmida sharciyada iyo tallaabooyinka doorashooyinka ee codbixinta
- Caawimo kasta oo la xiriirta doorashooyinka

Doorashooyinka Degmadda Multnomah waxay doonaysaa in aad awoodid inaad si fudud ugu codeeysid, si gaar ah oo madax bannaan, fahamto tallaabooyinka cod-bixinta, fahamto sharciyada doorashooyinka, oo ogaatid qofka aad weydisanaysid caawimada. Xaaladda codeeye-kasta waa ay kala duwan yihiin. Fadlan kala xiriir Doorashooyinka Degmadda Multnomah wax caawimaad ah.

Doorashooyinka Gobolka Multnomah

Telefoonka: 503-988-3720 | Iimaylka: [elections@multco.us](mailto:elections@multco.us) | Shabakada:

[www.mcelections.org](http://www.mcelections.org)

Doorashooyinka Gobolka Multnomah

Cinwaanka: 1040 SE Morrison Street, Portland OR 97214

Goobta Cod Bixinta waa goob cusub oo adeeg dheeraad ah bixin doonta lana furi doono 15 maalmood kahor doorasho kasta oo 2018 ah.

Doorashooyinka Degmada Multnomah Goobta Cod Bixinta

Cinwaanka: 600 NE 8th Street, Gresham OR 97030

